# "BAYAAN - Shirweynaha Golaha Nuqabada Wilaayaatka Islaamka 1444"

**18 Rabiicul Thaani 1444H (12 Novembar 2022)** – Kadib markii ay ku guul daraysteen duullaanadii tooska ahaa iyo kuwii dadbanaa kuna fashilmeen dhamaan istaraatiijiyadihii dagaal ee ay u adeegsadeen duminta nuurka Allaah, waxay maanta saliibiyiinta reergalbeedka iyo dabadhilifyadooda murtadiinta ah maciin bideen abaabulka mooryaantii iyo maleeshiyadii qudaacu-duruqa ahaa ee ay horay dalka uga tirtireen Mujaahidiinta, iyagoo rajo ka qaba inay mooryaantaas xaqiijiyaan wixii ay ku guuldaraysteen dowladaha Afrikaanka ah 15kii sano ee lasoo dhaafay.

Talaabadan ayaa ah mid daliil u ah sida shisheeyaha kusoo duulay wadanka iyo kabaqaadkiisa murtadiinta ah ugu jabeen loolanka ay kula jiraan xaqqa, waxaana Allaah ka rajeyneynaa in lagu kala bixi doono dagaalka wakhti dhow, isku daygan cusubna noqon doono midkii ugu dambeeyey ee ay ku burburi lahaayeen maamullada ay gaaladu dhisatay Allaah idankii.

Hadaba, Iyadoo laga ambaqaadaayo xaaladda uu dalku marayo, iyo guluf dagaaleedka ka dhanka ah shareecada Islaamka ee ay ku dhawaaqday kooxda cusub ee ay gaaladu soo dhoodhoobtay, ayaa waxay Golaha Nuqabada Wilaayaatka Islaamiga ah yeesheen shirweyne ay uga arinsanayaan xaaladaha soo kordhay iyo mowqifkooda ku aadan duullaanka lagu soo qaaday sharciga Allaah ee ay maanta ku naaloonayaan malaayiin muslimiin ah oo ku nool koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya.

Shirkan oo ah mid daba socda shirweynihii 28kii Rabiicul Awal, 1444 ay yeesheen culimada Wilaayaatka Islaamiga, ayaa waxaa kasoo qeybgalay [60] kamid ah Golaha Nuqabada Wilaayaatka Islaamiga, si ay u ayidaan fatwadii culimada, una caddeeyaan waxa uga aadan dagaalka ay ku dhawaaqday kooxda riddada ah ee la doonayo in lagu burburiyo shareecada Islaamka.

Kadib niqaash iyo aragti wadaag furan oo qaatay mudo dhowr maalin ah laguna gorfeynaayey isbedellada dalka iyo xaaladda uu wadanku ku sugan yahay, waxay Golaha Nuqabada Wilaayaatka Islaamiga ugu dambeyntii shirweynahooda kasoo saareen qodobada soo socda:

1. Wuxuu goluhu bogaadinayaa shirweynihii 28kii Rabiicul Awal, 1444, usoo gabagaboobay culimada Wilaayaatka Islaamiga, waxayna si kaslooni iyo niyad sami ah ku aqbaleen kuna qaateen fatwadii sharciga ahayd ee laga soo saaray kulankaas barakeysan. Waxaan culimadeena u cadeyneynaa inaan noqon doonno kuwa ugu horeeya ee u taagan dhaqan gelinta axkaamta iyo go'aannada ku xusan fatwadaas, Umadda aan mas'uulka ka nahay ee aan matalnana aan gaarsiin doonnaa insha'Allaah.

2. Wuxuu goluhu isku raacay in meel looga soo wada jeesto dagaalka uu ku dhawaaqay madaxweynaha kooxda riddada, wuxuuna aaminsan yahay goluhu inuu dagaalkaasi yahay gardaro aan geedna loogu soo gaban oo lagu soo weeraray deegaannada lagu maamulo shareecada Islaamka, waxaan cid waliba oo horor ku ah Wilaayaatka islaamiga u cadeynaynaa inuu dhiigeena kasoo horeeyo qabsashada dhulka lagu xukumo shareecada Allaah.

3. Golaha Nuqabada Wilaayaatka Islaamiga ah ee Soomaaliyeed -iyagoo ku hadlaya magaca beelaha ay matalaan- waxay cadeynayaan inay bari ka yihiin kooxda riddada ah iyo mooryaanta ku abtirsada beelahooda ee biiriyey safka gaalada iyo murtaddiinta, waxayna ballan qaadayaan inay noqon doonaan dadka ugu horeeya ee xabadda ku ridaya haddii ay soo weeraraan dhulka lagu maamulo sharciga Allaah.

4. Goluhu wuxuu qabaa'ilka Soomaaliyeed ugu baaqayaa inay naf iyo maal ku bixiyaan difaaca kitaabka Allaah, oo ah midka uu dhiigoodu ku kala badbaaday, nabad iyo karaamana ku heleen. Waxaan ku boorrineynaa qabaa'ilka inay wiilashooda kusoo feyliyaan sufuufta Mujaahidiinta si aan u wada difaacano shareecada Allaah ee naga wada dhexeysa gaaladana aan dalkeena uga xoreysanno.

5. Wuxuu goluhu bogaadinayaa mowqifka amaanan ee ay qabaa'ilada Soomaaliyeed ka qaateen dagaalkii uu ku dhawaaqay madaxweynaha kooxda riddada.

Waxaan u mahadcelineynaa beel waliba oo iska diiday baaqyadiisa dhegahana ka fureysatay, garab istaag buuxana u muujisay Mujaahidiinta, si gaar ah beelaha ku biiray dagaalka ee hor istaagay duulaannadii cadowgu kusoo qaaday deegaannadooda.

6. Wuxuu goluhu baaq u dirayaa odayaasha iyo waxgaradka Soomaaliyeed ee ku sugan deegaanada cadowgu heysto, waxaan leenahay Allaah ka cabsada oo qabaa'ilka aad hormuudka u tihiin ku hogaamiya shareecada Islaamka, barina ka noqda murtaddiinta iyo gaalada gumeysi doonka ah.

7. Goluhu wuxuu baaq u dirayaa qabaa'illada ku kadsoomay ballanqaadyadii beenta ahaa ee Xasan Sheekh Maxamuud, islamarkaana ku biiray dagaalka ka dhanka ah Shareecada Allaah. Kuwaasi waxaan leenahay, weli waxaad heysataan fursad qaali ah, ee Allaah u towbadkeena kana joogsada dagaalka aad kula jirtaan diinka Allaah. Waxa maanta laydiin adeegsanaayo waa dagaal uu ka quustay gumeystihii saliibiga ahaa iyo dabadhilifyadiisa kuwaas oo 15 sano kadib, maanta isku diyaarinaya inay gacanta ka taagaan dagaalka oo ay isaga huleelaan wadanka.

8. Wuxuu goluhu cod dheer ku cadeynayaa inuu kasoo horjeedo barina ka yahay colaadaha sokeeye ee gumeystaha saliibiga ah iyo maamulada gaalo raacyada ah ka hurinayaan Soomaaliya, wuxuuna qabaa'ilka walaalaha ah ugu baaqayaa inay ka digtoonaadaan in dib loogu celiyo dagaaladii sokeeye ee curyaamiyey 30kii sano ee lasoo dhaafay dalka, waxaa ceeb ah in dhexdiina colaad laga huriyo iyadoo ay degaanadiinii heystaan ciidamo gaalo ah oo kumannaan kiilo mitir kasoo duulay.

9. Wuxuu goluhu mar kale cadeynayaa inuu kasoo horjeedo, faragelinta shisheeye iyo qorsheyaasha dhagareysan ee uu gumeystaha saliibiga ah la damacsan yahay diinta, dalka iyo dadkiisa, oo ay ugu horeeyaan burburinta maamulada Wilaayaatka Islaamiga ah, iyo hirgelinta maamulo gaalo-raacyo ah oo dadka ku xukumaya dimuquraadiyadda iyo calmaaniyadda.

10. Wuxuu goluhu ka digayaa halista daroogada iyo maandooriyaha sida xad dhaafka ah loo soo gelinaayo wadanka ee laga soo dhoofinayo dibadda, sida Khamriga, tubaakada, Qaadka, Xashiishka iyo waxa la midka ah, kuwaasoo ay

wadanka keenaan dowlado iyo shirkado qandaraas kula jira madaxda murtaddiinta, si ay uga macaashaan daroogeynta da'yarteena.

11. Wuxuu goluhu ka digayaa fisqiga iyo fasaadka faraha kasii baxaya ee ka dhashay daroogada dalka lasoo gelinaayo, wuxuuna ku baaqayaa in gacan bir ah lagu qabto dadka hormuudka ka ah fasaadka bulshada dhexdeeda lagu faafinayo sida zinada, anshax xumada iyo dhallan-rogga. Waxaan culimada iyo mujaahidiinta ku boorineynaa in si wadajir ah la isaga kaashado baabi'inta munkarka ku faafay wadanka, iyadoo la adeegsanaayo wadiiqo walba oo sharciga waafaqsan.

12. Goluhu wuxuu dhalinyarada ciidanka u ah kooxda ridada ugu yeerayaa inay Allaah u towbad-keenaan, kana soo baxaan safka kooxda ridada ah ee ku daaban gaalada kusoo duushay wadanka, taasoo xukunkeeda lagu cadeeyey fatwadii kasoo baxday culimada Wilaayaatka Islaamiga 28kii Rabiicul Awal 1444 iyo kuwii ka horeeyeyba. Haddii aadan kusoo biireynin safka Mujaahidiinta, xaabo ha u noqonina gaalada hororka ah ee duullaanka kusoo qaaday diintiina, dalkiina iyo dadkiina.

13. Goluhu wuxuu Culamaa'u suuga ugu baaqayaa inay allaah u towbadkeenaan, hor istaagiisana ay xusuustaan, umaddana aysan u gacan gelinin gumeysiga horarka ku ah dalkooda iyo diinkooda.

14. Goluhu wuxuu ku baaqayaa in si wadajir ah looga hortago dagaalka ba'an ee lagu curyaaminaayo dhaqaalaha Umadda Soomaaliyeed, lagu boobaayo hantidooda, laguna burburinaayo kheyraadkooda iyo wax-soo-saarkooda. Hanjabaaddii iyo caga-jugleyntii ay xukuumadda ridadu u jeedisay ganacsatada Soomaaliyeed, ayaana marag u ah dhaca lala doonaayo umadda soomaaliyeed.

15. Goluhu wuxuu ganacsatada Soomaaliyeed ugu baaqayaa inay naftooda iyo maalkooda ka difaacdaan dowlad ku-sheegga aan diin iyo duunyo midna u dhowreynin Umadda, waxaadna ogaataan in qofkii la dilo isagoo difaacaya naftiisa iyo maalkiisa uu yahay shahiid ku baxay waddo xaq ah.

16. Wuxuu goluhu ugu baaqayaa, ganacsatada, qeybaha bulshada iyo Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab in la iska kaashado sidii looga hortagi lahaa khalkhalka lagu haayo habsami usocodka suuqyada xorta ah ee dalka, talaabana laga qaado

hay'adaha iyo shirkadaha Shisheeye ee u hanqal taagaya inay gacanta ku dhigaan ganacsiga wadanka iyo xaalufinta kheyraadka.

Cadowga ugu halista badan ee duullaanka kusoo qaaday umadda Soomaaliyeed, waa kooxda calmaaniga ah ee Turkiga taasoo milateri iyo dhaqaale ahaanba inoogu soo duushay, waa dowlad cadaawad gaamurtay u heysa islaamka iyo muslimiinta, marwaliba oo ay aragto sare u kaca muslimiinta waxay u xusul duubtaa sidii ay u xagal daacin lahayd una hoos geyn lahayd gumeysiga gaalada saliibiyiinta.

Waa dowlad ku gabata magac Islaamnimo oo wakiil ka ah isbaheysiga NATO iyo dowladaha reergalbeedka, loona wakiishay gumeynta muslimiinta, waxaana tusaalaha ugu dhow uu yahay wixii ay ka geysatay Liibiya, Suuriya iyo Afghanistan, oo ay imikana Soomaaliya ku heyso.

10 kii sano ee lasoo dhaafay, waxay shirqoollo dhagareysan u qooleysay maamullada shareecada ee ka jira Wilaayaatka Islaamiga, waxayna dhaqaale xoogan ku bixineysay tababarka, taakuleynta iyo taban-taabada maleeshiyaad murtaddiin ah oo ay u kaalmeysato boobka dhaqaale ee ay ka waddo Soomaaliya, balse markii ay ku guuldareysatay damacyadeedii gurracnaa ayey ugu dambeyntii si toos ah ugu soo biirtay dagaalka.

Dadka Soomaaliyeed guud ahaan iyo gaar ahaan qabaa'ilka aan matalno, waxaan fareynaa inay u diyaar garoobaan sidii aan nafteena iyo maalkeena uga difaacan lahayn kooxdaan dhiig miiratada ah, waana ka guuleysan doonnaa bi'idnillaah sidaba aan uga guuleysanay gumeystayaashii iyada ka horeeyey.

Golaha Nuqabada Wilaayaatka Islaamiga wuxuu bogaadinayaa, dhiiragelinayaa, taageero iyo garab istaag buuxana u muujinayaa, ciidamada Mujaahidiinta ee ku sugan thuquurta iyo furimaha dagaalka, ee dhiigooda u huraya kor-yeelidda kalimadda Allaah iyo difaaca daarta Islaamka. Waxaad tihiin geesiyaal lagu diirsaday Sabra oo sugnaada, lana sabartama cadowga Allaah, Haka daalina ka hortagga qorsheyaasha cadowga iyo raadsashadiisa, ogaadana guusha Allaah waxaa leh adoomadiisa mu'miniinta ah ee u gargaara diintiisa.

Allaah wuxuu yiri:

﴿يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِن تَنصُرُوا اللَّهَ يَنصُرْكُمْ وَيُثَبِّتْ أَقْدَامَكُمْ﴾[1]

---

[1] [محمد: 7]

Ugu dambeyntii; Golaha Nuqabada Wilaayaatka Islaamiga, waxay soo dhaweynayaan dadaalka xooggan ee gudiga gurmadka Abaaraha Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab uu ku bixiyey sidii loo caawin lahaa dadka ay abaaruhu saameeyeen ee ku nool Wilaayaatka Islaamiga, waxaanna leenahay Jazaakumullaahu kheyral Jazaa, Allaah ha idinka abaalmariyo dadaalka iyo juhdiga aad ku bixineysaan sidii ay Umaddaan u badbaadi lahayd adduun iyo Aakhiro intaba.

Wuxuu goluhu soo dhaweynayaa, kuna baaqayaa in lasii ballaariyo mashaariicda laga hirgeliyey deegaannada u nugul abaaraha ee ay saameynta ku yeesheen Abaarihii dalka ku habsaday sanadkaan, sida mashruuca biyo xireenka degmada Buula-Fullaay qodida wabiga shabeelle min kurtawaarey ilaa sablaale iyo mashruuca biyo gelinta Arabow oo ay bulshadu ku diirsatay.

قال النبي ﷺ: «هَلْ تنصرون وترزقون إلا بضعفائكم»[2]

Dadka Soomaaliyeed ee ay abaaruhu saameeyeen, waxaan leenahay, tani waa musiibo aan gacmoheenna ku kasbannay, sidaas daraadeed aan Allaah u towbadkeenno, culeysyada iyo duruufaha adagna yeysan nagu hogaaminin inaan u cararno xeryaha qaxootiga ee gaalada, aan u cararno xagga Allaah, isagana talo saaranno. Haddii shisheeyaha iyo hay'adihiisa gargaar laga helayo waxay gurmad u fidin lahaayeen dadka ku tabaaleysan xeryaha ku yaalla hareeraha madaxtooyada Muqdisho, halkaas oo ay gaajo ugu dhimanayaan dadkii kasoo barakacay deegaannada ku xeeran Muqdisho.

﴿ وَمَنْ يَتَّقِ اللَّهَ يَجْعَلْ لَهُ مَخْرَجًا (2) وَيَرْزُقْهُ مِنْ حَيْثُ لَا يَحْتَسِبُ وَمَنْ يَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ فَهُوَ حَسْبُهُ إِنَّ اللَّهَ بَالِغُ أَمْرِهِ قَدْ جَعَلَ اللَّهُ لِكُلِّ شَيْءٍ قَدْرًا ﴾[3]

Waxaan Allaah uga mahad celineynaa roobka uu nagu galladay xilligan ee billowga ah kaasoo ka da'ay gobollada wadanka qaar, waxaana Rabbi Subxaanahu Watacaalaa ka rajeneynaa inuu inoo sii daa'imiyo kana dhigo roob aan dhib wadan oo lagu barwaaqoobo.

[2] صحيح البخاري
[3] [الطلاق: 2-3]

Dadka muslimka ah ee Soomaaliyeed meelkasta oo ay joogaan -dal iyo dibadba- waxaan leenahay: maamulada Wilaayaatka Islaamiga ah waxaa maanta cadligooda usoo xukun taga, dal iyo dibadna uga yimaada malaayiin muslimiin ah, waxay wadanka kusoo dabaaleen shareecada Islaamka, taasoo sababtay in dadku ku kala badbaadaan, amni iyo horumrna ku helaan. Haddii aad dooneysaan dowlad idiin dhowraysa diintiina, dadkiina iyo dalkiina, garab iyo gaashaan u noqda maamulladaan Islaamiga ah ee u taagan hirgelinta shareecada Islaamka.

Anagu haddii aan nahay Golaha Nuqabada Wilaayaatka Islaamiga, waxaan dadka aan mas’uulka ka nahay iyo ehelkeena ugu baaqeynaa in loo istaago sidii garab loogu noqon lahaa Mujaahidiinta u halgamaya hirgelinta shareecada Islaamka iyo burburinta maamullada dhawaaghiida ah ee ka jira dalka, waxaana ballan qaadeynaa inaan hor istaageyno awood waliba oo isku dayda inay carqaladeyso nabadda iyo xasiloonida lagu helay ku dhaqanka Shareecada Islaamka.

Al-Kataib

﴿ وَلِلَّهِ ٱلْعِزَّةُ وَلِرَسُولِهِۦ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَلَٰكِنَّ ٱلْمُنَٰفِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴾